**DEKEREETO-XUKUMADEED 30 Maarso 1965, Lr. 9**
**Dhismaha Wakaaladda Qaranka ee Maydiga/Xijiga.**

MADAXWEYNAH JAMHUURIYADDA

MARKA UU ARKAY qod. 63 ee Dastuurka;

TIXGALIYAY baahida deg-degga ee loo qabo dhismaha Wakaalad Dawladeed oo baddalaysa qayb ahaan hawlihii ay lahayd Wakaaladdii Qaranka ee la baabi'iyay ee (Ente Nazionale Ammassi e Motoaratura ''E.N.A.M"), waxay isku xilsaaraysaa soo guridda,ka shaqaynta iyo iibka daryeelka wax soo saarka iyo qiimaynta noocyada wax soo saarka maydiga iyo xijiga Gobollada Majeerteenya (Bari) iyo Burco, si loogu sameeyo u qalmid wacan baahida horumarka dhaqaalaha qaranka;

MARKII la arkay Soo Jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, la Dhagaystay Golaha Wasiirrada;

Wuxuu Dekereeto ku soo saaraya:

**Qod. 1**
**Dhisidda**

1. Waxaa la dhisay Wakaaladda Qaranka Maydiga iyo Xijiga (E.N. I).
2. E.N.I. waa Wakaalad Dawladeed oo leh shaqsiyad qaanuuneed oo madax bannaan.

**Qod. 2**

E.N.I. xarunteedu waa Boosaaso waxay ku yeelan kartaa laamo iyo wakiillo iyo sidoo kale xafiisyo dalka Jamhuuriyadda iyo dibaddaba.

**Qod. 3**

E.N.I. ulajeeddadeedu waa:

a) dhiirigalinta iyo kobcinta abaabulka iyo soo gurista maydiga iyo xijiga Jamhuuriyadda,
b) daryeelka kobcinta wax soo saarka ku wajahan kor u qaadista iibka dalka gudahiisa iyo qiimaynta noocyada kala duwan ee wax soo saarka Soomaalida ee dibadda loo dhoofiyo, kadib marka la kala sooco, la lagu qoro tilmaamaha iyo calaamdaha u keydsan wax soo saarka Soomaalida;
c) in si joogto loo diyaariyo sidii loo aqoonsan lahaa wax soorka qaranka ee maydiga xagga dibadda marka horana lagu sameeyo tirakoob.

**Qod. 4**
**Hantida**

Hantida Wakaaladda waxay ka koobantahay;

a) hanti guurto ah (oo ay ku jiraan xirmooyin maydi ah) iyo maguurto, laga helay xaq-gudidda E.N.A.M.);

b) hanti guurto iyo maguurto oo horay Xukuumadda Jamhuuriyadda u qoondaysay si ay u gaarto ulajeeddadii loo dhisay;
c) lacag keyd ah oo ay wehliso qayb faa'iidada ka mida hawlaha;
d) lacago kale oo la siiyo, oo lagu kobcinayo taakulaynta, oo Dawladda ku deeqdo ama Wakaaladaha Dawladda;
e) deeqo, xiriiro, iyo deeqo kale oo laga helay hay'ado dawladeed ama kuwa gaar ahaaneed.

Si loo joogteeyo hantida maguurtada, guurtada iyo maaliyeed waxaa laga sameeynayaa qoraal meel lagu hayo.

**Qod. 5**
**Maamulka Wakaaladda**

Xubnaha Wakaaladdu waa:

1) Guddoomiyaha
2) Golaha Maamulka
3) Agaasimaha
4) Guddiga Hantidhowrka.

**Qod. 6**
**Inta uu ka koobanyahay Golaha Maamulka**

Golaha Maamulku wuxuu ka koobanyahay Guddoomiyaha, saddex xubnood oo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsigu soo magacaabo, iyo saddex kale oo uu soo magacaabo Wasiirka Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha, marka la dhagaysto talada Guddoomiyeyaasha Gobol ee lixda xubnood la soo sheegay ay khusayso.

Agaasimuhu waxaa uga qaybgalayaa isago qabanaya xilka Xoghaynta, isago aan lahayn xaqa codka ee shirarka idil Guddiga Maamulka.

**Qod. 7**
**Magacaabidda Xubnaha Golaha Maamulka iyo Agaasimaha.**

Guddoomiyaha iyo Agaasimaha waxaa lagu soo magacaabayaa Dekereetooyin kala gaara Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu talo ku soo jeediyo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga uuna oggolaado Wasiirka Maaliyadda iyo la dhagaystay Golaha Wasiirrada.

Xubnaha kale waxaa lagu magacaabayaa dekereeto Wasiirka Koobaad, kadib marka u soo jeediyo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, lana dhagaystay Golaha Wasiirrada.

Xil-haynta la soo sheegay waxay soconaysaa saddex sano, haddii aan ka hor laga noqon ama loo cusboonayn siyaabaha iyo qaababka lagu soo sheegay faqradda la soo sheegay.

## Qod. 8
## Xilka Guddoomiyaha

Guddoomiyuhu:

a) wuxuu leeyahay mataaladda sharci ee Wakaaladda E.N.I.,wuxuuna qabtaa xilalka ku cad Dekeereetada xukuumadda iyo Xeerka lagu dhisay Wakaaladda;
b) wuxuu isugu yeeraa oo shir-Guddoomiyaa Golaha Maamulka;
c) wuxuu go'aamiyaa waxyaabaha ay ka doodayaan Golaha Maamulka; wuxuuna ilaaliyaa fulinta go'aamnada;
d) xaaladaha deg-degga ah ee maqnaanshaha ama reebitaanka, Guddoomiyuhu wuxuu magacaaba qofka isaga baddalaya.

## Qod. 9
## Xilalka Golaha Maaamulka

Golaha Maamulku wuxuu qabanayaa dhammaan awoodaha caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn ee maamul si loo gaaro hadafka E.N.I.

Si gaara waxaa u sugnaaday Golaha Maamulka in ay go'aan ka gaaraan:

1) soo jeedinta wax ka baddalka xeerka E.N.I. inta xeerarka jira ay oggolyihiin;
2) hannaanka lagu qabanyo lacagaha maamul kasta;
3) miisaaniyadda sanadlaha;
4) nidaamyada E.N.I. oo ay ku jiraan dhismaha, xaaladda sharci iyo macaamilka dhaqaalaha iyo dhimista shaqaalaha;
5) soo jeedinta tariifada qiimaha ku habboon ee la siinayo maydiga;
6) kala soocidda, maqaan-siinta summadda kaydsan ee wax soo saarka Soomaalida oo ku saabsan noocyada maydiga dibadda loo dhoofiyo, sidoo kale kobcinta iibka gudaha;
7) oggolaashaha iyo maamulka aan caadiga ahayn iyo kan caadiga marka midkan dambe uu keenayo culays maaliyadeed ee gaaraya 50.000 (kontonkun) shilin;
8) wax kasta ee ah dan-guud, iyo wax kasta oo Guddoomiyuhu uu u arko in uu wax ku ool u yahay danta guud.

Wixii quseeya maaddada ku xusan lr. 5, Guddiga Maamulka, marka ay meelmarinayaan qiimaha u dhigma kuwa la siiyay maydiga waa in tirada lagu daro xitaa natiijooyinka dhaqaalaha ee maamulka.
Qiimayaasha waxaa lagu goynayaan dekereeto Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, uuna oggolaado Wasiirka Maaliyadda marka uu dhagaysto talada Golaha Golaha Wasiirada.
Wixii ku saabsan ansaxnaanta fadhiga Golaha Maamulka waxaa loo baahanyahay joogitaanka aqlabiyadda inta ay ka koobanyihiin.
Ansaxnaanta go'aamada meelmarinta waxaa loo baahanyahay oggolaashaha codka aqlabiyadda inta joogta fadhiga, haddii ay codadku isla ekaadaan, codka Guddoomiyha halka u maro ayaa go'aanku raacayaa.
Xoghayaha Guddiga waa Agaasimaha ama cidda ku xigta.

## Qod. 10
## Xilka Agaasimaha

Agaasimuhu:

a) wuxuu qaabilsanyahay fulinta go’aamada Golaha Maamulka iyo Guddoomiyaha isagoo saxiixaya  waraaqaha arrimahaas la xariira;
b) waa madax shaqaalaha, wuxuu ilaaliyaa nidaamka, wuxuu diyaariyaa waajibaadka xaafiisyada iyo  xarumaha, marka laga reebo marka Xeerka Heshiiska Wakaaladdu shardi ka dhigayo oggolaashaha Guddoomiyaha;
c) waa madaxa adeegyada idil ee Wakaaladda isagoo diyaarinaya maarayntooda caadiga;
d) wuxuu u xilsaaranyahay arrimaha maamulka caadiga ee ku saabsan mas’uuliyadaha maaliyadeed ee aan ka badnayn 50.000 (kontonkun) Shilin Soomaali;
e) wuxuu soo diyaariyaa miisaaniyadda iyo tirakoobyada qalabka E.N.I. oo la horkeeynayo Golaha Maamulka;
f) wuxuu keydiyaa buugaagta iyo qoraallda xisaabaadka;
g) wuxuu qabtaa xilkasta ee xeerarku u oggolyahiin.

**Qod. 11**
**Guddiga Hantidhowrka**

Guddiga Hantidhowrka wuxuu ka koobanyahay Guddoomiye ah, laba xubnood joogto ah iyo laba aan joogto ahayn, laguna soo magacaabo dekereeto Wasiirka Koobaad, marka uu helo tala soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Gaanacsiga, uuna ooggolaado Wasiirka Maaliyadda. Xubnaha Guddiga Hantidhowrka xilka waxay haynayaan  saddex sano haddii muddaddaas ka hor aan laga noqon ama loo cusboonaysiiyo qaababka lagu soo xusay faqradda la soo sheegay.

**Qod. 12**
**Xilka Guddiga Hantidhowrka**

Guddiga Hantidhowrka waa hay’ad baaris ee gudaha ee Wakaaladda. Wuxuu xilkeeda gutaa isagoo ilaalinaya  xeerarka u degsan Baarayaasha Xeerka Madaniga, wixii la dabbaqii karo.
Guddigu awodihiisa kale waxaa ka mida:

a) baarista maamulka Wakaaladda wixii ku saabsan ilaalinta xeerarka, dekereetooyinka, Xeerka Wakaaladda iyo xeer nidaamyada Wakaaladda;
b) xaqiijinta markasta in si saxan buugagta loo keydiyay iyo qoraallada xisaabaadka.

**Qod. 13**
**Mushaaraadka**

1. Gunnooyinka, mushaaraadka iyo abaalmarinnada oo ay ku jiraan iyo xusuus qorrada joogitaanka Guddoomiyaha iyo Agaasimaha waxaa lagu goynayaa dekereeto Wasiirka Koobaad marka uu soo jeediyo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga isla markaaana ay oggolaadaan Guddiga Ilaalinta ee ku xusan qogobka 18.
2. Xubnaha Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka waxaa u sugnaaday gunno sanadle ah, sidoo kale gunno joogitaanka kulamada ay ka soo qaybgalaan.